

Tartankii Quraanka ee Carruurta Darul Quba

Waxaa taariikhdu markey ahayd Janaayo 6-da ka dhacay Masaajidka Darul-Quba ee Magaalada Minneapolis tartan xagga akhrinta Quraanka, Higaadda, Siirada Suubanaha(csw) iyo Caqiidada Islaamka. Tartankan oo ay ka soo qaybgaleen Waalidiin fara badan iyo Aqoonyahano ka socday Bulshada ayaa waxaa aad loogu farxay sida carruurta ay wax u barten. Waxaa ay carruutu sidii la arki jirey ay u higaadiyeen una qoreen Aayadaha loo yeeriyo.



Waxaa kaloo ay dadkii ka soo qayb galay ku farten sida ay carruurta wax ugu qoraal looxaanta iyo dhaqanka wanaagsan ee ay carruurta ka barten culumadda wax barta.



Waxaa ay dadkii ka soo qaybgalay tartankaas ku farxeen markii ay gabadh yar oo 5 jir ah ay akhrisay suurado ka mid ah Quraanka iyadoo weliba ku akhrisay Tajwiid cod wanaagsan(Ma Sha-Allah). Waxaa laga sameeyey tartankaas iyo kii sanadahii ka horeeyey Video laga heli karo Maktabadda Darul-Quba.



Ahmed Ali
Magteyn1711@hotmail.com